Royal College of Anaesthetists

# Suuxdinta oo la faahfaahiyey

Warqadaan waxay sharaxeysaa waxa suuxdintu tahay, qaabka ay u shaqeyso iyo marka loo baahan karo. Waxay kaloo sharaxeysaa faa'iidooyinka iyo halisaha suuxdinta iyo sida aad u dareemi doontid.

Muhiim ahaan, waxay kuu sheegeysaa waxa aad u baahantahay si aad u qorsheysato caawinaadaada kadib marka lagu suuxiyo.

Waxaa qoray bukaano, wakiilada bukaanada iyo suuxiyeyaal isla shaqeynaya.

Suuxdinta had iyo goor waxaa laga qaataa xididka (IV ama xididka dhexdiisa), balse mararka qaar waxaa laga qaadan karaa afka ama qalab afka lagu xirto.

## Waa maxay suuxdinta xididka?

Suuxdinta xididka waa marka dawo wax suuxisa lagu duro xididkaaga ayadoo ugudbeysa dhiigaaga ayadoo la marinayo tuubada faleebada si laguu dejiyo.

'Suuxiye' waa magac la siiyey xirfadle caafimaad oo shaqadaas qabto.

Waxaa loo tabo baray in ay ku siiyaan xadiga rasmiga ah ee suuxdinta iyo maareeynta wixii dhib ka yimaado. marka la joogo qolka qaliinka, suuxiyaha had iyo goor waa suuxiye. Meelaha kale, waxaa laga yaabaa in ay noqoto/noqdo kalkaaliso, takhtar qaliin ama xirfadle kale oo loo tabo baray. Suuxiyahaga wuu kula joogi doonaa dhamaan int lagu guda jiro daweyntaada.

Waxaa jira saddex heer ee suuxdinta xididka. Waxaa la yiraahdaa 'mid yar','mid dhexe',(mararka qaar la yiraahdo maan-dejin) iyo suuxdin 'meel dheer'.

- **Suuxdinta yer** Waa lagu siinayaa xaddi yer oo dawada wax suuxisa. Waxaad dareemi doontaa in aad dhaqdhaaqi weydo kamana welweli doontid waxa agtaada ka dhacaya, laakiin waad soo jeedee waxaadna awoodaa in aad hadasho si caadi ah. Waxay u badan tahay in aad xasuusato daawayntaada, laakiin ma wada xasuusan doontid wax walba si faahfaahsan. Suuxinta yer ma saameyneyso neefsashadaada.
- **Suuxinta dhexe(miyir dejinta)** - suuxiyaha wuxuu ku siin doonaa daawo suuxin ah, sidaas daraadeed waxaad dareemi doontaa in dhaqdhaqaaqaada uu aad u yaraado dawakhaadna waad dareemi doontaa. Muhiim in kastoo tahay, suuxiyahaga wuu kula hadli karaa waxaadna awood u yeelan doontaa awooda ah in aad ka jawaabto tilmaaha qaar ee fudud. Waxaa laga yaabaa in aad xasuusato qaar kamid ah dawayntaada. Suuxinta dhexe ma saameyneyso neefsashadaada.
- **Suuxinta meel dheer** - Suuxiyaha wuxuu ku siin doonaa xaddi aad u wayn oo ka kooban hal iyo wixii kabadan oo dawo ah taasoo kaa dhigeysa in aad seexato inta lagu daweynayo. Takhtarkaaga kaama sugayo in aad la hadasho inta uu ku daweynayo. Neefsashadaada waxaa laga yaabaa in la saameeyo suuxiyehaagana wuu ku caawinayaa hadii loo baahdo. Waxaa laga yaabaa mararka qaar in aad xasuusato qayb kamid ah dawayntaada. Ingiriisak marka la joogo, Suuxdinta meel dheer waa in uu sameeyaa shaqaale leh tababar iyo xirfad heer suuxiyenimo.

## waa maxay suuxinta laga qaato afka?

Tani waxaa loo isticmaalaa in lagu dejiyo bukaanada aad u baqa inta aan la sameynin suuxdinta guud, laakiin badanaa kuma filna in ay dhaqdhaqaaqa kaa joojiso inta lagu guda jiro qaliinka ayada keligeed. Waqti ayey qaadaneysaa si ay u shaqeyso waxaana wayna adkaan kartaa in xaddiga rasmi ah la helo maadaama ay dadka ku kala duwan yihiin.

**Fadlan takhtarka guud(GP) ha ka codsan in uu kuu qoro dejiye afka laga qaato si aad u qaadato inta aadan isbitaalka imaanin, in aad saxiixdo mooyaane warqada fasaxa, maadaama dawo ay saameyn karto fikirkaaga iyo go'aan gaarista.**

Waxaa muhim ah in aad si sax ah u fakari karto marka aad la kulanto takhtarka si aad ugala hadashoo halisaha una saxiixdo warqada oo aad sheegtid in aad ku raacsan tahay in qaliinka waxqabka laguu sameeyo.

## Waa maxay farqiga u dhexeeya suuxinta iyo suuxdinta guud?

Farqiga ugu waawayn oo udhaxeya suuxinta iyo suuxdinta guud waa:

- Heerka soo jeedkaaga
- In loo baahan yahay qalab si neefsashadaada loo caawiyo
- Waxyeelooyinka ka imaan kara.

Marka suuxdinta ay yer tahay ama dhexdhexaad tahay waxaad dareemi doontaa dawakhaad, waad degan tahay, hurdo ayad dreemeysa iyo dhaqdhaqaad la'aan, laakiin fikirgaaga wuu soo jeedi doonaa inta dawaynta lagu guda jiro.

Suuxdinta guud guu ahaanba wax jawaab celin ah ma bixineysi mirikaaguna wuu tagayaa inta dawaynta la wado.

Suuxdinta meel dheer ah waxay u dhexeysaa labadaan lasoo sheegay.

## Dawayntee baa la qaban karaa marka xididka la iska suuxiyo?

Dawaynt yeryer oo badan waxaa lagu sameyn karaa marka la isticmaalo suuxdinta xididka. Tusaalooyinka waxa ka mid ah:

- Baaritaanka laga qaado maqaarka ama naasaha
- Kabida yar ee lafaha jabay
- Qaliimada yaryar ee maqaarkaa, gacanta ama lugta
- waxaqabadyada lagu caawiiyo ogaanshaha dhibka caloosha(baaritaanka jirka), sambabka (baaritaanka sanbabka), xiidmaha waawayn (baaritaanka xiidmaha waaweyn) ama kaadiheysta (baaritaanka kaadiheysta)
- ka saarida ilig ama dawaynta ilkaha
- qaliinada indhaha, sida caad fiiqida.

## Waa maxay faa'iidooyinka suuxinta laga qaato xididka?

- Si dhaqso ah ayey shaqo ku qabanee dawada xaddigana waa lagu hagaajin kara inta kugu filan.
- Waxaa kuu ogolaaneysaa in dhaqdhaqaaqaada uu aad u yaraado inta lagu daweynayo. Waxaa kalo lagu fasiri karaa in aad wax yar xasuusan doonto dawayntaada ka dib.
- Qaliinyada qaar, waxaa laga maarmayaa baahida in suuxdin guud la sameeyo kaasoo aan ku habooneyn bukaanada xanuun kale qaba.

- Had iyo goor waxyeeladeedu wey ka yartahay suuxdinta guud.
- Kasoo kabsashada waa ay ka dhaqsi badan tahay tan suuxdinta guud, sidaa darteed hal saac kadib gurigaaga waad aadi kartaa hadii aad caadi kusoo noqoto.

## Waa maxay Khataraha suuxdinta xididka?

- Heerka neefsashadada waxaa laga yaabaa in ay hoos uu dhacdo. Tani wey badan tahay marka suuxinta meel dheer la isticmaalo, laakiin waa halis mar walba oo la isticmaalo suuxdinta. Suuxiyaha wuxuu aqoon u leeyahay in uu kula socdo wuuna k caawin karaa hadii loo baahdo.
- Waxaa badan in cadaadiska dhiigaaga uu hoos u dhaco, laakiin Suuxiyaha waa loo tababaray saaso kale in uu wax ka qabto tani.
- In aad xanuun dareento ama matag wey dhici karta, laakiin ma badna.
- Xasaasiyada dawada suuxdinta ad ayey u yertahay.
- Waxaa laga yaabaa in xanuun yer ka dareento meesha kaanoolaha lagaaga duray ama la isku dayey in lagaaga duro.
- Markaas ka bacdi waxaa laga yaabaa in aad dareento in aadan taagnaan karin, waxaadkan halis ugu jirtaa in aad kufto, gaar ahaan hadii aad da' tahay.
- Suuxdinta wey sameyn kartaa fikrkaaga iyo xusuustaada ilaa 24 saac.

## Waa maxay waxyaabaha lagu bedelan karo Suuxdinta?

- **Suuxdin guud:** waad miyid daboolidoontaa si guud inta lagu guda jiro waxqabadka wax xusuus ahna ma yeelan dooontid.
- **Suuxin goobeed ayadoon suuxdin la isticmaalyen:** waad soo jeedi doontaa si guud ahaan inta lagu guda jiro dawayntaada, laakiin waad deganaandoontaa. Shaashad ayaa la gaaga qarin doonaa qaliinka.

## Yaa go'aan ka gaaraya in aan suuxdin qaato iyo in kale?

Waxaad kala hadli kartaa wixii dookh ah takhtarkaaga ama kalkaalisada xilliga lagu baarayo. Hadii aanan laguu sheegin, had iyo goor waad weydiin kartaa in aad qaadato.

Hadii aad halis la xiriira caafimaadkaaga ay jiraan, takhtarkaaga ayaa kaala tashan doono dookhakh kale kadibna go'aan ayaad wada gaari kartaan.

## Waxaan qaadanyaa suuxdin, maxaan sameeyaa inta aanan imaan Isbitaalka?

- Hadii ay jiraan dad aad masuul ka tahay, tusaale caruur ama dad da' ah, waxaad u baahantahay in aad qorsheysato in qof kale kuu sii eego ilaa maalinta xigta.
- Qof wayn wuxuu u baahan doonaa in uu guriga kugu geeyo gaari ama taksi - laakiin caadiyan maya gawaarida bulshada. Maadaama saameynta suuxdinta ay sii jireyso 24 saac, waa in ay kula joogaan habeenkaas si ay kuu ilaaliyaan.
- U soo qaado dhamaan dawooyinkaaga isbitaalka, oo ay ku jiraan qalabka lagu neefsado hadaad isticmaaleysey.
- Hadii aad jirro qabto, hergeb ama uur, fadlan la xiriir isbitaalkaaga sababtoo ah waxaa laga yaabaa in ayan kugu habooneyn in lagu suuxiyo. Daweyntaada waxaa laga yaabaa in dib loo dhigo.
- U sheeg takhtarkaaga maalinta qaliinka hadii aad naas nuujineyso.
- Iska saar dhamaan waxyaabaha la isku qurxiyo - oo ay ku jirto cidiyada la gashto iyo dahabka - Kahor inta aadan iman isbitaalka. Waad xiran kartaa jijinta arooska.
- Soo qaado dhar fudud, tusaale xirashada cambuur, si aad u nasato kulkana kuugu celiso. Soo gasho kabo siman oo aad si fudud u gashan karto.

## Ma cuni karaa wax ma cabi karaa inta aanan dawaynta gaadanin?

Xarunta caafimaad ama isbitaalka ayaa kuu sheegaya macluumaadka istaajinta cuntada iyo cabitaanka.

Caadiyan waxaa laguu sheegi doonaa in aad cuntada joojiso lix saac ka hor inta aadan dawaynta qaadanin, laakiin waad cabi kartaa biyo caadi ah ilaa laba saac ka hor daweyn taada. Biyaha nadiifka ah oo laguu ogol yahay in aad cabto waxaa ka mid ah biyaha, (casiirka fudu oo aan ku jirin wax adag) iyo shaaha madow ama kafee( oo aan caano ama kareem ku jirin).

Hadii aad sokor qabto, waa in aad weydiisaa talaabooyin gooni ah oo ku saabsan goorta aad qaadaneysid dawadaada oo aad joojineysid cunida cuntada.

## Maxaa dhacaya kahor daweynteyda?

Caadiyan waxaad xiran doontaa cambuur. Markaad qolka qaliinka gasho, suuxiyaha wuxuu kugu xiri doonaa qalabka la socoshada. Qalabka la isticmaalo wuxuu ku xiran yahay nooca qalliinka iyo nooca suuxdinta aad qaadaneysid, laakiin had iyo goor waxaa ku jiraya:

- Qalabka cadaadiska dhiiga lagu cabiro oo gacantaada lagu xiri doono.
- Wuxuu la sii shaqeynayaa xabadkaaga si loo diiiwaan geliyo dhaqdhaqaaqa wadnahaaga.
- Waxaa fartaada lagu xiri doonaa qalab si loo cabiro heerka oksijiinkaaga.
- tuubo caag ah oo cabireysa tirada kaarbon-laba-oksaydh ee aad neefsato. Tani caadiyan waxaa lagu xiraa qalabka afka lagu xirto ee oksijiinta.

## Qaabkee loo siiyaa suuxdinta xididka?

- Dejinta waxaa loo siiyaa kaanoole kaasoo la galinayo xididka gacantaada ama gacantaada gadaasheyda. Intii badan ayaa lagu siin karaa sida aad ugu baahati inta waxqabadka uu socdo. Marka suuxdin meel dheer la sameeyo waxaad qaadan doontaa dawo xididka lagaa siinayo si joogto ah.
- Had iyo goor waxaad lagu siin doonaa oksijiin si aad uga neefsato tubo ku jirta sankaaga, ama qalabka wajiga lagu xiro.

## Suuxdinta sedee ayuu dareenkeda yahay?

Tan wey ku kala duwanan tahay dadka, ayadoo ay ku xiran tahay inta dawada ay ku siiyeen. Inta lagu guda jiro suuxdinta waad hurdi doontaa, laakiin marka suuxdinta ay fududahay waxaad dareemeysaa dhaqdhaaq la'aan.

Markaan weydiiney bukaanada qaar waxay dareemeen, qaar waxay ku jawabaan:

*'Waxaan dareemay in aan meel ku maqanahay oo aana riyaanayo'*

*'Waxaan u maleynayey in aan soo jeedo inta aan ku jiray balse mararka qaar waan baxayey waxaan arkay hal saac ka dib'*

*Waxaan dareemay dhaqdhaaq la'aan iyo farxad .*

*'Waxay ahayd wax aan caadi ahayn - Waan ka dhex baxsanaa waxa agteyda ka dhacayey.*

## Goormeen guriga aadi karaa?

- Hadii aad qaadatay suuxin fudud ama meel dhexaad ah, waxaad caadi ahaan aadi kartaa guriga saacad gudahood daaweyntaada.
- Hadii aad qaadatay suuxin meel dheer ah, soo kabshadaada waxay qaadan kartaa hal ilaa laba saac. Marka aad guriga aadi karto waxay ku xiran tahay caadiyan kasoo kabshadaada dawada naftirkeeda.

## Ma jiraan tilmaamo muhiim ka dib dawaynta?

- sidii horey loo soo sheegaybay, qof weyn oo awooda ayaa u baahan doona inuu kugu qaado gurigaaga gaari ama taksi - caadiyan maya gaadiidka bulshada - wuuna kuna joogayaa habeenkaas. Hadii aanan awal hore lagu talo galin in qof ku raaco marka lagu daweeyo ka dib, waxaa laga yaabaa in aad aadiweyso guriga marka lagu daweeyo ka dib.
- Suuxinta waxey kaa dhigi kartaa in aad cagahaaga ku istaagi weyso. Fadlan is ilaali marka aad jaranjar fuuleyso qofna kaxeyso hadii aad lacala dareento in aad istiignaan weydo.
- Go'aan qaadashadaada waxaa laga yaabaa in ay dawado saameyo mudo 24 saac kadib dawayntaada, sidaas awadeed go'aano muhim ah ha sameynn xiligaas. Is ilaali hadii aadwarbaahinta bulshada isticmaaleyso.
- Waa in aadan ku noqon shaqada, oo aadan masuul ka noqon dadka kugu xiran, oo aadan gaari wadin, wax karin ama aadan ka shaqeyn wax matoor ku shaqeeyo ilaa 24 saac gudahood. Waxay qaadan kartaa 24 saac dawada si ay jirkaaga uga baxdo.
- Waa in aadan qaadan wax khamri ah ama kaniiniga hurdada muddo 24 sac kadib marka lagu daweeyo.
- Takhtarkaaga wuxuu ku siin doonaa talaabooyin qoran oo ku saabsan dawayntaada guriga kadib marka lagu daweeyo.
- Isbitaalka wuxuu ku siindoonaa taleefoon nambar oo aad kala soo xiriirto hadii aad dareento in aad fiicnayn inta aad guriga joogto.
- Haddii qalliinka kadib aad ka walwalsan tahay, dareento inaad fiicnayn, dareento inaad caafimaad qabtid, ama aad weydo lambarkan(lambarka isbitaalk), wac takhtarkaaga guud, garaac 111, ama aad qaybta xaaladaha deg dega ah ee deegaankaaga ayadoo uu ku kaxeynayo qof weyn.

## Su'aalaha aad weydiin karto suuxiyehaaga

1. Yaa suuxin i siin doono?
2. Miyaad kugula talinaysaa suuxdin ama suuxin guud?
3. Ma waxaan leeyahay halisyo gaar?
4. Goormen joojinayaa cunida iyo cabida ka hor inta aan la i suuxin?
5. Goormeen is diyaariyaa si la ii soo qaado?

## Dhibaatooyinka ka imaan karo dawada, wax yaabaha ka dhalan karo iyo halista.

Suuxdinta xilliyadaan casriga ah, dhibaatooyinka halista ah kuma badno. Halista gebi ahaanba meesha lagama saari karo, laakiin dawooyinka casriga ah, qalabka iyo tababarada waxay suuxdinta ka dhigeen mid aamin ah sanadahaan dambe.

Suuxiyeyaalka waxay sameyaan dadaallo tiro badan si ay uga hortagaan halisaha ku jirta qeybtaan. Suuxiyehaaga wuxuu kuu sheegi karaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan halisahan iyo taxaddarrada la sameyay sidii loog hortagi llahaa.

Dadku wey ku kala duwan yihiin sida ay u fasirtaan ereyada iyo lambarada. Qiyaastan waxaa laguu siiyey in uu ku caawiyo.



| Aad u badan | Caadi ah | Ma badno | Dhif iyo naadir | Aad naadir u ah |
|---|---|---|---|---|
| **1 ka mid ah 10** | **1 ka mid ah 100** | **1 kamid ah 1,000** | **1 ka mid ah 10,000** | **1 ka mid ah 100,000** |
| Hal qof ee qoyskaaga ah | Hal qof ee joogo laamiga | Hal qof Oo joogo tuulo | Hal qof oo joogo magaalo yer | Hal qof oo magaalo weyn joogo |

Waxaad kaloo ka heli kartaa macluumaad dheeri ah bogaga macluumaadka bukaanka ee koleeja ku leedahay bogeeda: www.rcoa.ac.uk/patientinfo

## Ilaha dheeraadka ah

- Caawinida qof suuxdin guud qaatay ama suuxdin (www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation)
- Heerarka suuxdinta miyirka ee bixinta adeega ilkaha. Koleejka takhaatiirka qaliinka boqortooyada ee ingiriiska iyo koleejka boqortooyada ee suuxiyeyaalka. *RCoA* 2015 (http://bit.ly/2T2mZh6).
- Hagaha bixinta adeegyada suuxdinta *RCoA* 2016 (www.rcoa.ac.uk/gpas).
- Tababarada suuxdinta aaminka ah ee nidaamka xirfadlayaasha caafimaad: heerarka iyo hagaha. Akademiyada koleejyada caafimaad ee boqortooyada. *AoMRC* 2013 (http://bit.ly/301ndq8).

Waxaad ka heli kartaa waraaqaha macluumaad dheeri ah website ka koleejkawww.rcoa.ac.uk/patientinfo. Warqadaha waxaa kaloo laga heli karaa qaybta suuxdinta ama qaybta baaritaanka koowaad ee xuranta caafimaad ee isbitaalkaaga.

## Halisaha la xiriira suuxdintaada

Warqadaha la xiriir halisaha qaar ee suuxdinta ama waxqabadyada suuxdinta waxaad kaloo ka helee bogga koleejka: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets. Waxay bixiyaan warqadaha macluumaadka bukaanka ee kor lagu taxay.

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

# Noo sheeg waxaad u maleyneyso

Waan soo dhoweyneynaa talooyinka si loo horumariyo warqadaan.

Hadii aad heyso wax talo ah oo aad jeclaan lahayd in aad jeediso, fadlan email ku dir: patientinformation@rcoa.ac.uk

**Koleejka Suuxiyeyaalka ee Boqortooyada**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

## www.rcoa.ac.uk

### Daabacaada koowaad 2018

Warqadaan dib ayaa loo eegi doonaa saddex sano gudahooda laga bilaabo daabacaada koowaad.

**© 2018 Koleeka Boqortooyada ee Suuxiyeyaalka**

Warqadaan waa la koobiyeen karaa si loogu soo saaro macluumadka bukaanka. (Fadlan soo qaado ilshaan rasmiga ah) Hadaa rabto in aad isticmaasho qayb kamid ah warqadaan daabacaad kale, Mahad celin u qalanto waa in laga bixiyo saasoo kale loogada, calaamadaha iyo sawirada waa in laga saaro. Wixi dheeri ah fadlan nagala soo xiriir.